
# Xeerarka Wada Qaxwaynta

**(Café Guidelines)**

Inaad martigaliso wada qaxwayn laga helo ma aha wax adag—Waxay ku egtahay oo kaliya hadba sidaad adigu u sawirato!. Wada qaxwaynta sidaad u samayn lahayd waa mid aad adigu habaysan karto oo ku qaban karto xaalado kala duwan. Xeerarka hoos ku qorani waxaad u isticmaali kartaa siyaabo kala duwan. Waxayna soo dhawaynayaan wadahadalo laysu kaashado, Ka qaybgal fir fircooni leh, iyo fursado wax lagu qaban karo.




**Cadde Ujeedada**

Muhiimad gaara sii sababta aad dadka isugu keenayso. Hadii aad aqoonsato sababta wada kulanka u qalqaalinayso, waxay kuu suurto galinaysaa inaad tixgalin siiso ka qaybgalayaasha aad u baahantahay, meelaha iyo qiyaasaha muhiimka u ah si aad u gaarto ujeedadaada.

**Diyaari Gole ku haboon kulanka**




Wada qaxwaynta caalamigu waxay aad culays u saartaa in awood iyo muhiimad ay leedahay in kulanka lagu qabto meel u qalanta- meel nabad ah oo dadka oo dhan soo dhowaynaysa. Marka dadku dareemaan  kalsooni, way dadaalaan, waxayna la yimaadaan heerka ugu sareeya ee fakarka iyo hindisaha, khaas ahaan markay hadlayaan iyo markay dadka dhagaysanayaan, tixgali sida casuumadaada iyo sida shirka aad u qaabisay ay wax ugu kordhin karaan abuurista jawi dadka soo dhawaynaya.




**Diyaarso suaalo wax ku ool ah**

Helitaanka iyo qaabinta suaalo wax ku ool u ahi, Waa meelaha ay ka qaybgalayaasha wadaqaxwayntu ka heli karaan afkaarta iyo feejignaanta dhalin kara natiijooyin wax ku ool ah. Wada qaxwayntaadu waxay la iman hal suaal ama suaalo badan  oo saacidi kara sii waditaanka wadahadal yeesha afkaar cusub oo socota ilaa dhowr wareeg oo wada hadal ah. Marar badan wada hadallada wadaqaxwayntu waxay ku saabsan yihiin waxyaabo cusub oo soo ifbaxa iyo sida suaaluhu u yeelan karaan awood ay ku heli karaan xal dhaqangal ah

**Fakarka iyo baraarugu ku dhalin karaan natiijooyin qoto dheer.**

Wada qaxwayntaadu waxay soo bandhigi kartaa hal suaal ah, ama suaalo badan oo kugu caawima in ay ku gaarsiiyaan natiijooyin caqli gal ah oo cusub,inta  wareegtooyinka isdaba jooga ah ee wada hadalku socdaan.




Xaalado badan, Wadahadallada wada qaxwayntu waxay aad ugu saabsabyihiin sidii loo heli lahaa suaalo xoog leh oo dhalinkara xal wax ku ool ah.




**Dhiiri gali qofkasta fikradiisa**

Hadaynu nahay hogaamiyeyaal waxaynu si buuxda u ognahay in muhiimad uu leeyahay ka qaybgalku, laakiin dadka badidisu ma rabaan ka qaybgal oo kaliya, waxay rabaan inay si firfircoon wax u soo kordhiyaan si ay uga qaybqaataan isbadalka. Waxaa muhiim ah in la dhiirigaliyo cid kasta oo timaada fadhiga oo rabta inay soo kordhiso fikrado iyo talooyin, adigoo sidoo kale ogolaanaya in cidkasta oo rabta inay ka soo qaybgasho aad dhagaysato.

**Xariir u same aragtida kala duwan**




Fursada kuu ogolaanaysa inaad marba miis ama gogol tagto, la kulanto dad cusub, waxay si firfircoon u kobcinaysaa fakarkaaga, waxayna isugu kaa xiraysaa waxyaabaha kaaga soo ifbaxaya goobaabta fikradaha sii ballaranaya, kuwaas oo ah calaamadaha u gaarka ah fadhiyada wada qaxwaynta. Marka ay ka qaybgalayaashu u sii xambaartaan fikradaha muhiimka ah iyo nuqdadaha xiisaha leh miisadaha ama gogosha cusub, waxay isdhaafsan doonaan talooyin ku saabsan siday wax u arkaan oo si wayn u kobcinaysa suurta galinta waxyaabo cusub oo si lama filaan ah loo fahmo

**Dhagayso waxa laysla fahmey soo bandhig waxa soo kordhay**

Ka qaybgalka iswada dhagaysiga, u soo jeedsashada naaxiyada hadalka, habka hadalku u socdo, iyo fahamka biyo dhaca, waxaan bilaabaynaa in aan fahano in uu abuurmay isku xiran dadku isku xirmayo.Taaso dhacda kadib dhawr wareeg oo la wada hadlo. Mararka qaarkood way fiicantahay in la abaabulo. Wada hadal inta fadhidoo dhami u dhantahay. Taasi waxay siisaa ka qaybgalayaasha oo dhan fursad  ay ku wada fahmaan mawduuca iyo suaalaha miiska ama gogosha yaal

**Bal siday u egtahay wada qaxwayntu**

Wada fariisi afar ilaa shan qof miis aad u salaxaday **Wada Qaxwayn** yar ood ugu talo gashay cutub dad ah.

Samee dhowr lab oo wada hadallo isdaba jog ah caadiyan (Sadex) oo qaata ilaa 20-30 daqiiqo

Suaalaha iyo arimaha sida xaqiiqadaa muhiimada ugu  leh noloshaada, shaqadaada iyo bulshadaad ka tirsantahy ayaa la hirgalinayaa, inta dadka miisadaha kale fadhiyaa ka munaaqashoonayaan suaalo kuwaa la mid ah.

# Sida Wadaqaxwaynta lag rabo
**(Café conversation  at a glance)**

- Fariisi miisas yar yar afar ilaa shan qof ama koox koox sida qaabka wada qaxwaynta.
- Diyaari wadahadal xariirsan, caadi ahaan ilaa saddex wareegto oo wadahadal ah kaas oo ah mid soconaya 20 ilaaa 30 daqiiqo.
- Isku maquuli su'aalaha sida dhabta ah muhuumka ugu ah noloshaada , shaqadaada ama bulshada aad ku nooshahay inta kooxaha miisaska kale fadhiyaa  is waydiinayaan su'aalo  kuwaas la mid ah.
- ku dhiiri gali kuwa fadhiyada martigalinaya iyo ka qaybgalayaashaba inay yeeshaan xasuus qor ay ku qortaan fikradaha muhiimka ah marda miiska u saaran ama boorar waawayn ama loox miiska barankiisa la dhigo.
- Marka la dhamaystiro qaybta wareega hore ee wada xaajoodka , waydii in hal qof miiska ku haro sidii inuu yahay martigaliye. inta kuwa kale u dhaqmayaan sida musaafiriinta ama safiirada macnaha sameeya" musaafiriintu waxay la soo safrayaan fikrado qiima leh, sheekooyin iyo suaalo ay ku soo biirinayaan fadhiyadooda cusub.
- Waydii qofka martigaliyaha miiska ah in uu soo dhaweeyo martida cusub si gaabana ula socodsiiyo fikradaha muhiimka ah, mawaadiicda iyo su'aalihii wadahadaladii hore. Ku dhiiri gali martida inay isku xiraan ama isku nudaan fikradihii hore iyo kuwa dambe iyagoo si taxadar leh u isudhagaysanaya,  macno wanaagsana ka dhalinaya fikradaha ay isku biirsadaan.
- Marka aad dadka siiso fursad ay ku soc -socdaan oo ku sameeyaan dhowr wareeg oo laysku dhaafsado, fikradaha, su'aalaha iyo mawaadiicda waxa dhacaya in ay wararka isla helaan dhamaadka wareega labaad. Waxaa suurta galaysa in dhamaan dadka fadhiga hore ka soo qaybgalay ee qolka kuwada jiraa  ay isasii waydaarsadaan warar isfamkii hore xambaarsan.
- Wareegtada saddexaad ee wadahadalka dadku waxay ku noqon karaan gurigoodi oo ah miiskii ama fadhigii ay markii hore kasoo ambabaxeen si ay  isugu buuxsadaan xogtii ay soo ururiyeen ama waxay sii wadan karaan safarkoodii oo ku tagaan miisas kale ama fadhiyo cusub, iyagoo ku dhaafaya miiska martigaliyihii hore ama martigaliye cusub. Mararka qaarkood wareega sadexaad waxaa la soo kordhin karaa su'aal kasii qodo dheer kuwii hore taas oo soo bandhigta amuuro cusub.
- Kadib dhawr wareeg oo wada hadal iswaydaarsi ah, bixi waqti si wadajir ah laysu waydaarsado wixii wadahadalka ka soo ifbaxay iyo wixii dhamaan dadka fadhiga ka soo qaybgalay isla fahmeen. fadhiyada qaabkaas ah ayaa yeelan kara shax la tilmaami karo, ayna ka dhalan karaan fikrado laysku raaco iyo in  ay soo ifbixaan fursado waxa lagu qabsan karo.
- Marka aad ogtahay guulaha aad gaari karto iyo waqtiga aad ku bixin karto shaqada, waxaad go'aansan kartaa inta aad dheeraynkarto wadahadalka iyo inta wareeg ee uu hadalku socon karo, sida ugu fiican eed suaalaha u isticmaali karto iyo sida ugu xiisaha badan eed fikradaha laysugu xiriirinayo laysuna waydaarsanayo.

**Adaabta Wadaqaxwaynta**

Diirada saar muhiimada

Soo kordhi rayi!

Maanka iyo qalbiga ka hadal

Dhagayso aad fahamtide

Isku xariiri oo isku xir Fikradaha

Isla dhagaysta fikradaha iyo suaalaha qotada dheer

Ciyaar , Xasuusta qor,Sawiro. Wax ku qorida marada

miiska waa lagugu dhiiri galin

Ku madadaalo (Have Fun)!

# Muhiimada ay leeyihiin Suaalaha Wadahadaladu

**(The Importance of the Café Questions)**

Suaalaha aad doorato ama kuwa ka soo dhexbaxa wadahadalka ka qaybgalayaasha wadaqaxwayntu waxay muhiim u yoihiin sidii wadahadalka guulo loogu gaari lahaa, Waxaa laga yaabaa in aad hal suaal ah isku taxalujis inaad ka baaraan dagto ama suaalo dhowr ah oo saacida kasii baarandagida tii hore, kuwaasoo soconayaa ilaa dhowr wareeg oo wadahadalku sii socdo.

**Mankaaga ku hay**

- Suaalaha habooni waxay kordhyaan awooda ka qaybgalka , waxayna suurta galiyaan in aynu diirada saarro waxa muhiimada . Dadka khibrada u leh martigalinta  wada qaxwayntu waxay soo bandhigaan suaalo furan, kuwa aan jawaabtoodu ku idlaan Maya ama Haa.

- Suaalaha wanaagsan ujeedadoodu maaha in tillabo dag dag ah cidi qaado, waxay sameeyaan qodqod
- Dhaliya miro taasoo ka duwan daafacaad iyo iskafaaiidaysi gurracan

- Suaashu inay wanaagsantahay waxaad ku garan siday u dhaliso afkaar xiiso leh iyo waliba waxyaalaha suurto galka ah eetixgalinta mudan

- Suaalaha ka booti dadka aad markaas isleedahay waa muftaaxa wadahadaka, si aad u aragto inay sii wadaan xiisaha ay suaalaha u hayaan

## 5 dariiqo oo macluumaadka lakala helay loo bandhigi karo

**Istcmaal Dadka sheekooyinka sawira**

Wada qaxwaynta qaarkeed waxaa diiwaan galin karaa qof  sheekada sawiraya, qofkaasi wuxuu ku qorayaa boor wayn, ama darbi waynasgoo qoraal iyo sawir u isticmaalaya  si uu u qeexo nidaamkii uu wadahadalku u dhacayey.

**Daawo darbiyada**

Marar kalena dadka isku miiska fadhiyaa waxa darbiga ku dhajinayaan afkaartoodii ay qoreen si dadka miisadah kale fadhiya ay u arkaan qolaba qolada kale marka nashada gaaban lagu jiro

**Waxaad curiseen soo dhajiya**

Ka qaybgalayaashu waxay soo dhajin karaan Post-Its* ooh al hal fikrad ah lagu qoray deedna sabuurada ama darbiga lagu dhajiyo, si qofkastaa u arki karo waqtiga nasashada gaaban

Fikradaha isu gee

Fikradaha dadku ku dhajiyey Post*Its-ka isu gee gee  si  fikradaha isku dhow isku meel looga arki karo ayna diyaar u noqdaan marka ay guruubku diyaarinayaan tilaabada ku xigta midan.

**Samee Sheeko**

Wada qaxwaynta qaarkeed waxay dadku abuuraan warqada akhbaarta(newsletter) ama booga sheekada, si ay natiijada shaqada ay qabteen ka curatay ugu gudbiyaan dad intaas ka badan marka ay martigalintu dhamaato, qofka sawirka iyo qoraalka sheekada ku samaynaya wuxuu samaynkaraa boog sheekadii oo sawirani ku taal, taaso leh qoraal iyo waxyaabo diiwaan gashan

# Sida loo abuuro jawi Wadaqaxwyneed

**(How to Create a coffe ambiance)**

Hadii aad soo dhawaynayso  dad dhawra ama dad boqolaal gaara, waxaa lagama maarmaan ah inaad samayso jawi soo kordhinaya dareen lays xiisaynayo oo ay ka muuqato is rabid iyo is xodxodasho.

Marka ay martidaadu kuu timaado waa inay dhakhsadiiba ogaadaan inuu fadhigani ka duwanyahay fadhiyadii kale.

- Haday suurta gal tahay dooro meel  leh iftiin caadi ah, laga arki karo banana qurxan, qurxi jawiga
- Adigoo dhaqankaaga isticmaalaya.
- U ekaysii  goobta sida meelaha loogu talo galay wada qaxwaynta(Dhaqanka Somaaliga xiji)
- U same miisado yaryar  oo ilaa shan ama afar qof fadhigooda loogu talo galay. Afar qof wixii ka yari ma soo kordhin karaan in dadku kala duwnaadaan(Fakarka iyo meelaha ay kayimaadeenba) Shan qof wixii ka badanina waxay buuq ku dhalin kartaa wadahadalka curadka ah(Bilawga ah).
- Misadaha ama fadhiyada u dhig si isdhextaal ah, intaad ka dhigi lahayd sidii wax safan.
- U fiirso Misadaha maqaayadaha marka ay cabaar furantahay maqaayadu waxay u ekaadaan inay caadi ku soo dhawaynaya noqdaan .
- Maryaha miiska ee midabada leh iyo fiyoore yar oo miisadaha la saaro isticmaal, Haday suurto gal tahayna shamac yar ku dar. Qolka dhir iyo hidahaaga ku sharax
- Marada miis walba dul saar warqado waawayn oo wax lagu qori karo  iyo koob lagu rido qalimada wax lagu calaamadeeyo oo midabo kala duwan leh iyo kuwa caadiga wax loogu qorto warqadaha iyo qalimadu waxay saacidaan qofka oo falfalaada ama wax sawira iyo rayigoo uu isku xirxirto, sidaasi waxay keenaysaa in dadku aaraadooda si isdaba jog ah u soo tuuraan.
- u dhig miis dheeraad ah, qofka martigaliyaha ah iyo cidii kale oo wax soo bandhigaysa si ay u saartaan qalabkooda.
- Tixgalin sii inaad aayad quraan ah,Xadiith nabawi ah, wax farshaxan ah ama maah maah ama hadal wanaagsan oo qof yiri ama gabay/buraanbur mufiid ah ku dhajiso darbiyada. Dadka riyaaqooda tixgali  maqashii  quraanka cadiimka ah iyo xadiiska nabawiga ah inta ay goobta soo galayaan.
- Si aad dhaqanka bulshada u tixgaliso ku marti soor dadka cunno iyo cabid

Isticmaal fakarkaaga una sharaxo sida adiga kula haboon

# Qalabka Wadaqaxwaynta

**(Café supplies)**

Misado yaryar oo wareegsan 56 to 42 inches waa sida ugu fiican, miisadah isku laabka ahna waa la isticmaali karaa.
Kuraas ku filan dadka imanaya oo dhan

Maryo midab leh oo miisadaha la saaro

Looxyada wax lagu qoro ama warqadaha ballaran oo miisdaha la dulsaaro

Qalimada wax lagu calaamadeeyo oo midab leh, maaha kuwa dhiiqa ama ku lima warqada

Crayoala iyo Mr. Sketch baa ugu fiican

Si loo akhriyi karo isticmaal midabada digoon sida cagaar,  madow, buluug,  iyo barbal

Koobkana ku rid hal ilaa labo midabada furan ah sida gaduud, cagaar furan,buluug furan ama orange si aad ugu istcmaasho dhinaca nuurinta fikradaha muhiimka ah

Dhari yar oo aan ubax lahayn ama koobka qaxwada oo miis walba la saaro si qalimada iyo markarada loogu rido

Miis loogu talo galo saarida cuntada iyo cabitaanka

Muraale (6 ilaa-48 inch dere leg) ama loox(Board) wax lagu dhajiyo (flip chart) oo loogu talo galay in lagu soo aruuriyo fikradaha laysu keenay, iyo rape wax lagu suro

Darbi siman oo 12 inchi ah ama labo boa doo cad cad( 4x6) inch midwalba.

Darbi dheerad ah oo wax lagu dhajin karo shaqadii wadajirka loo qabtay

**Hadii aad kari karto waad dooran**

Projector dusha lagu ifiyo, (Overhead projector and screen

Qalabka loo duubista warka sida cajalado ama CD

Doorashada dhinaca waxa aad daka maqashiinayso ama ku soo dhawaynayso CD..

Makrafoono aan lahayn fiilo ku xiran

Borarka la tiiriyo iyo warqadaha la rogo

Qalabka asaasigaa sida birta isku dhajinta waraaqaha, warqado,biinan, goome, lastiig, qalimada calaamadaynta, tape( masking tape), qalimo, biinanka ladu wax lagu mudo

Cardka noteka 5x8 inch oo noteka shakhsigaa lagu qoran karo

4x6 inch Post-its oo ah midabo furan oo fikradaha lagu dhajinkaro

# Waxaan ahay martigaliyaha wadahadalka maxaan sameeyaa?

**(I’m the cafe Host, what do I do?)**

Shaqada martigaliyaha wadaqaxwayntu waa inuu arko, in lixda xeer ee wadahadlka iyo isku baraarujintu dhaqangalaan. Maaha inaad qaabka sidiisa u raacdid wax aad ku qasbantahay, balse waxaa muhiim ah in aad ku shaqayso xamaasada xeerka wadaqawaynta. Inaad wada qaxwayn hirgaliso ama martigaliso waxay u baahantahay iskutaxalujin badan iyo inaad leedahay hindise farshxan iyo taxadar badan. Martigaliyuha wadaqaxwayntu wuxuu inoo cadaynaya wadahadalka dadku daneynayo inuu yahay midka dhalinaya fikrada wax xallinaysa.

La shaqee qalqaaliyeyaasha wada qaxwaynta si aad isula meel dhigtaan danta laga leeyahay wadaqaxwaynta, islana goaamiya dadka lagu soo casumayo kulanka

Wada qaxwynta ugu magac bixi si ku haboon hadba danta laga leeyahay sida: Wada qaxwaynta hormuudnimada, aqooniswaydaarsiga, khidadka, Baarista cilmiga, iyo wixii la mid ah

Ku caawim sidii loo fidinlahaa wada qaxwaynta

La shaqee qalqaaliyeyaasha siday u samynlahaayeen wadaqaxwayn loo bogo

Soo Dhawee ka qaybgalayaasha ama martida markay soo galayaan

U sheeg ujeedada kulanka

Soo bandhig suaalaha, barnaamijka iyo inta wareeg oo hadalku soconayo, waana inaad hubiso in suaashu u cadahay qofkasta adigoo ku qoraya Warqad wayn ood ugu talo gashay miis walba(Overhead flip chart).

Usharax xeerarka iyo aadaabta wadaqaxwaynta kuna dhaji warqado yaryar meel sare sida (easel sheet) ama kaarar aad saarto miis kasta.

U fasir habka iyo nidaamka martigalintu u shaqaynayso sida shaqada uu qabanayo qofka miiska martigaliyaha ka ahi(waa qofka ku tabarucaya inuu miiska ku haro kadib bilowga wareega koowaad ee hadalka ugu dambayntana ku soo dhaweeynaya martida cusub miiska)

Inta la wada hadlayo hadba miis tag

Ku dhiiri gali qof kasta inuu ka qaybgalo wadahadalka

Xasuusi dadka inay qrtaan fikradaha muhiimka ah

Si dabacsan ugu sheeg dadka marka la gaaro waqtigii ay dhaqaaqi lahaayeen oo bilaabi lahaayeen wareeg cusub iyo wadahadal

Hubi in fikradaha muhiimka ah ee soo ifbaxa aragt lagu diiwaangaliyo ama la soo aruuriyo oo haday suurta gal tahay la dhajyo.

Hindise fiican yeelo, si aad xaaladaada adiga kuu khaaska ah u waafajiso wadaqaxwayntaada

# Waxaan ahay marti galiyaha miiska. Maxaan sameeyaa?

**( I ‘m a Table Host, What do I do ?)**

Xasuusi dadka miiska kula fadhiya inay isku tilmaansadann qodobada xiriirka dhalinaya, fikradaha,waxyaabaha la kala faaiidaystey iyo suaalaha qotada dheer ee soo ifaya.

Ku har miiska marka kuwa kale ka tegeyaan, soo dhawee kuwa cusub oo imanaya miiskaaga
Si gaaban ula qaybso fikradihii muftaaxa hadakii hore u ahaa si kuwan dambe ay halkaa uga sii amba qaadaan una dhisaan fikradooda ayagoo toodii hore iyo tan dambe isku xiraya

### Aan isla socono(Stay in touch)

Sida habka wadaqaxwaynta ayuu xeerarkuna u soo can baxayaan. Marka aad samaynaysi Wadaqaxwaynta, waxaan jecelnahay inaan warkaaga maqalno. Nala socodsii sidaad u aragto khibrada aad ka hesho iyo sidaan uga sii dhigi lahayn mid intaa ka badan wax sii anfaca
Nagala soo xarii: info@theworldcafe.com adigoo noo soo diraya fikradahaaga iyo waxaad nagu siyaadinayso iyo hadii aad hayso wax faahfaahin ah oo ku saabsan akhbaar aanaan hayn sida sheekooyin ku saabsan wadaqaxwaynta, qaab martigalineed een ku siyaadin karno martigalinta, Haday jiraan qoraalo, xariiro(Links)ama wadaqaxwayn iyo wadahadallo noocan la bah noqonkara. Fadlan siyaaro http://www.theworld café.com

# Waa maxay Wadahadaka wadaqaxwayntu

**(What are café connversations?)**

Wadahadalka wadaqaxwayntu waa wax si sahlan loo isticmaali karo si laysula dhaqangaliyo wadahadalku saabsan suaalaha muhiimada u leh ku adeega hawlaha runta

ah. Wadaqawaynta iyo wadashaqaynta waxaa meelo badan loo aqoonsaday in siyaabo badan u suurta galiyaan ujeedooyinka. Waxaa ka mid ah Wada qaxwaynta wax lagu hindiso,tan aqoonta lagu kala kororsado, tan talooyinka lagu gorfeeyo, tan hogaanka,lagu saxo, tan wax lagu kala beecsado iyo tan tabaca lagu curiyo.
Badi wadahadalada wada qaxwayntu waxay ku salaysanyihiin mabaadiida iyo nidaamka ay soo bandhitay World Café(Arag www.thewarldcafe.com) waa dhaqdhaqaaq caalami ahoo loogu talo galy inuu saacido wadahadalada muhiimka u ah kambaniyada waawayn, dawladaha iyo ururada bulshad ee caalamka.

Wadahadalada wada qaxwayntu waa amuur loogu talo galay in xaalad lagu qodqodo oo inoo yeelaysa awood aan aan ku helno dariiqado cusub oon wax kaga badali karno, nolosheena iyo shaqadeenaba.

Awooda wadahadalku dhliyaa waa mid dabiici ah, mana muuqato siday u badantahayna looma fiirsado.

Eusaale ahaan, u fiirso inta aynu doorano inta aqoon aynu kororsanayno iyo ficil aan la imanayno ,marka dadku wadahadal uga gudbayo wadahadlkae sida qofka hayada u shaqeeyaa ula macaamilayo dadka uu la shaqeeyo ama kuwa kalyantiga u ah iyo dadwaynaha.

Hadaynu ka soo qaadno wadahadaladoo dhami inay hal wadaqaxwayn oo wax gal ah isku yihiin, iyadoo midkasta aan shaqo uga dhigayno inay yihiin hal miis dad wada fadhiya oo masalaya dad wadashaqayni nooli ka dhaxaysa ooh hal miis ku wada xariiraya, taas sow ma noqonayso xudunta dhalinaysa in aynu qaybsano aqoonta iyo murtida aynu ku maamulayno mustaqbalkeena?

Marka aynu isla fahamno awooda wadahadalku leeyahay inay tahay muftaaxa wada shaqaynta, waxaa inoo suurto galaysa inaan si wax tar leh ugu istcmaalno danaha dhamaanteen faaiidada inoo leh.

**Waa maxay muhiimada wadahadalka dariiqada Wadaxwaynta loo maro**

Waxaynu soo bandhignay xeerar isdaba jog ah oo inoo qeexayo si loo diyaariyo wadahad ku shaqaynaya hadallo laysdhaafsado oo xiiso leh. Hadii aad nidaamka xeerarka raacdo mark aad diyaarinayso kulankaaga , waxaad la yaabaysaa sida qiimaha talooyinka soo ifbaxayaa u sreeyo.

Marka aad wadahadl martigaliso adigoo isticmaalaya dariiqooyinkaan qaymaha leh, waxaad islamarkiiba arkaysaa inaad awood u leedahay inaad samaynkarto wadahadl dadka cajabiya oo xiiso gaar ah leh, kaasoo waliba ay kazoo bixi karaan rajooyin faaido lihi.

----Wada qaxwaynta waxaa la hindisey yadoo la aaminsanyahay in ay dadka horayba wadahadalku caado u ahaa oy isku dhaafsan jireen murtidooda iyo fiicnaantooda iy waxay abuuri karaan si ay uga hortagaan xitaa xaaladaha ugu adag , mar hadii laysa siiyey , nidaamkii wadahadalka iyo sida diirada loo saarayo

Waxaa suurta galay in la helay awwod inoo fasaxaysa in la inisticmaalo, aqoontaan qotada dheer ee muhiimada tilmaamaysa